## Waa maxay halkeena ayeey ka dhaceysaa dacwad-dhageysiga?

Markaad xeraysato rafcaan, kiiskaaga waxaa loo qorsheeyaa dacwad-dhageysi taleefoon ahaan ku dhacaya oo lala yeelanayo garsooraha sharciga maamulka ee ka socda xafiiska rafcaanka kaalmada dib-u-shaqaynta.

Dacwad-dhagaysigu waa hab xaqiiqo raadin ah, waana inaad goob-joog ahaataa si uu garsoouhua u tixgeliyo xaqiiqooyinkaaga marka uu go'aanka gaadhayo. Waa inaad wacdaa lambarka bilaashka ah ee ku qoran Ogeysiiska Dacwad-dhageysiga taariikhda iyo wakhtiga lagu muujiyay.

Dacwad-dhagaysigu waa mid rasmi ah oo isticmaala habraac sharci. Dhammaan marqaatiyada waxay ku marag furaan si ah dhaarin ama xaqiijin, dhinacyaduna waxay raacaan amarka garsoorahu dejiyay. Dhinac kastaa waxay xaq u leedahay inay markhaatiyaasha su'aalo waydiiso. Dukumentiyo ayaa loo soo gudbin karaa si caddayn ahaan ah.

Dacwad-dhageysiyada waa la duubaa. Duubista lagu sameeyay dacwad-dhageysiga ayaa ah waxa kaliya ee dib u eegis lagu sameeyo haddii go'aanka garsoorka racfaan dheeraad ah laga qaato. Dacwad-dhagaysigu waa muhiim maadaama ay tahay fursada kaliya ee aad ku soo bandhigi karto xaqiiqooyinka kiiskaaga.

Waxaad codsan kartaa dacwad-dhageysi fool-ka-fool ah/ shakhsi ahaaneed adigoo qoraal u soo diraya garsooraha oona ku muujinaya sababaha codsigaaga. Haddii laguu ogolaado, waxaa lagugu soo wargelin doonaa goobta dacwad-dhegeysiga ay ka dhaceyso. Dacwad-dhageysiga fool-ka-foolka ama shakhsi ahaaneed waxaa badanaa lagu qabtaa Xafiiska Waaxda Xoogsatada iyo Sharciga Addeega Shaqada ee Koonfurta Dakota ee kuugu dhow.

## Sidee baa la iigu soo ogaysiinayaa dacwad-dhegeysiga?

Ogeysiiska Dacwad-dhageysiga ayaa boostada laguugu soo diri doonaa ugu yaraan todobo maalmood ka hor dacwad-dhageysiga. Si taxadar leh u akhri ogeysiiska iyo warqad kasta oo ku lifaaqan ogeysiiska.

Ogeysiiska waxaa ku qoran taariikhda, waqtiga iyo lambarka taleefanka ay tahay inaad wacdo si aad u bilowdo dacwad-dhageysiga. Ogeysiiska waxaa sidoo kale ku qoran arrimaha kiiska iyo sharciyada ama xeerarka kiiska.

Haddii aadan helin ogeysiiska ama haddii aad codsatay dacwad-dhageysi oo aadna guurtay, isla markiiba ku wargeli xafiiska racfaanka adigoo wacaya 605.626.2310.

## Dib ma loo dhigi karaa dacwad-dhageysiga mise malaga noqon karaa racfaan qaadashada?

Haddii aadan awoodin inaad ka qaybgasho dacwad-dhageysiga sida loo qorsheeyay, codsiga dib u dhigista ayaa looga baahan yahay in loo diro xafiiska rafcaanka, gaar ahaan ugu yaraan 24 saacadood ka hor dacwad-dhegeysiga. Dacwad-dhageysiga waxaa dib loogu dhigi doonaa haddii lasoo bandhigo sabab wanaagsan oo kaliya.

Haddii aad codsatay dacwad-dhageysi oo aad mar dambe go'aansatid inaadan sii wadin dacwad-dhageysigaaga, racfaankaaga waxaad dib ula noqon kartaa waqti kasta ka hor dacwad-dhageysiga. Waa in aad boosto ahaan ama fakis ahaan ku dirtaa warqad aad kaga laabanayso rafcaankaaga sida ugu dhakhsaha badan xafiiska rafcaanka si dhinaca kale (ama dhinacyada) loo ogeysiiyo in dacwad-dhagaysiga la kansal-gareeyay.

## Miyaan u baahanahay qareen?

Waxaad dooran kartaa inaad naftaada ku matasho dacwad-dhageysiga. Garsooraha waxaa loo tababaray in uu qabto dacwad-dhageysi halka mid ama labada dhinacba aysan matalin kuwa kale.

Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad yeelato qareen ama wakiil kale oo idman.

Meel ha iska dhigin inaad go'aan ka gaadho haddii aad wakiil ku yeelanayso goobta dacwad-dhegeysiga iyo haddii kale. Haddii aad go'aansato inaad qabsato qareen, isla markiiba samee oo ogeysii xafiiska rafcaanka. Qareenkaagu wuxuu u baahan doonaa wakhti uu ku diyaariyo kiiskaaga ka horwakhtiga dacwad-dhegeysiga. Haddii aad shaqaaleysiisato qareen, waxay noqon doontaa in aad adigu kharashka iska bixisaa.

Waxa laga yaabaa inaad u qalanto caawimada sharciga mid ka mid ah barnaamijyada adeegyada sharciga ee gobolka haddii dakhligaaga/ ilahaagu ay xadidan yihiin. Hel macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan matalaadda sharciga adiga oo ka wacaya Adeegga U Gudbinta Qareenka ee Koonfurta Dakota lambarka 800.952.2333.

Xitaa haddii aad leedahay wakiil, waa inaad ka soo qaybgashaa dacwad-dhageysiga.

Loo-shaqeeyayaasha waxaa matali kara sarkaal ama shaqaalaha ganacsiga ama qareen oo u shatiyaysan inuu ku dhaqmo sharciga Koonfurta Dakota.

## Maxaa ka dhacaya goobta dacwad-dhageysiga?

Inkasta oo habraaca saxda ah uu kala duwanaan doono iyadoo ku xiran nooca kiiska, habka aasaasiga ah waa sida soo socota.

Dacwad-dhagaysigu guud ahaan waxa uu bilaabmi doona wakhtiga lagu muujiyay Ogeysiiska Dacwad-dhagaysiga. Xaqiiji inaad ka soo muuqato ama aad soo wacdo wakhtiga ay tahay goobta dacwad-dhegeysiga. Haddii aad iman waydo ama aad ka daahdo dacwad-dhegaysiga, waxa suurtogal ah in kiiskaaga la joojiyo ama waxaa lagu go'aamin karaa iyadoo lagu salaynayo caddaymo kale oo la hayo.

Bilowga dacwad-dhageysiga, garsooruhu wuxuu sharxayaa habka dacwad-dhageysiga, arrimaha la go'aamin doono iyo sida ay u kala horreeyaan maragfurka. Markhaatiyadu waxay caddeenayaan inay si run ah u marag furi doonaan. Dhinacyada, habka uu garsooruhu qeexay, waxay kiisaskooda ku soo bandhigayaan iyagoo marag kacaya, u yeedhaya markhaatiyada kale oona soo bandhigaya dukumentiyo ama caddaymo kale.

Kadib marka uu markhaati kasta marag kaco, qolada ka soo horjeeda waxay weydiin karaan su'aalo markhaatiga. Wakhtigan ma aha wakhti lagula doodo markhaatiga ama aad faallo ka bixinayso maragfurka, laakiin waa fursad aad ku waydiiso markhaatiga ama aad u hesho macluumaad waxtar u leh kiiskaaga. Garsooruhu waxa kale oo laga yaabaa inuu su'aalo waydiiyo dhinacyada iyo markhaatiyaashooda inta ay socoto dacwad-dhegeysiga.

Wakhtiga xiritaanka dacwad-dhegeysiga, dhinac kastaa waxay bixin kartaa bayaan gunaanad xiritaan ah, garsooruhuna wuu xidhayaa dacwad-dhegaysiga. Caadiyan, wax macluumaad ah laguma aqbalo diiwaanka ka dib marka dacwad-dhageysiga la xiro.

## iyo caddayn kale?

Haddii aad aaminsan tahay in qofka kaa soo horjeeda maraggiisu uu ka duwanaan doono kaaga, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad haysato markhaatiyo ama caddaymo kale oo caawiya kiiskaaga. La hadal markhaatiyada suurtogalka ah ka hor wakhtiga dacwad-dhegeysiga si aad u ogaatid waxay ka og yihiin kiiskaaga. Waa inaad soo bandhigtaa markhaatiyaal aqoon shakhsi u leh xaqiiqooyinka. Qofka aan u fiirsan waxa dhacay ama xasuustiisu ay xun tahay waa markhaati liita.

Isticmaal kaliya markhaatiyaasha aad run ahaantii aad u baahan tahay. Haddii aad haysato dhowr qof oo isku wax dhihi lahaa, isticmaal qofka sida ugu fiican u sheegi kara xaqiiqada. Xaqiiji in marqaatiyaashaadu diyaar u yihiin inay ka qaybqaataan wakhtiga loo qabtay dacwad-dhegeysiga iney ku dhacdo. Haddii aad u soo gudbinayso caddayn adigoo is-metalaaya, sida bayaannada saxiixan ee markhaatiyada, fadlan hubi in markhaatiyadaas ay diyaar u yihiin inay ka marag furaan bayaankooda qoran.

Waxaad la heli doontaa dukumeenti lambaraysan Ogeysiiska Dacwad-dhageysiga ee la xiriira kiiskaaga. Haddii aad hayso dukumeenti ama caddayn kale oo aad u baahan tahay inaad caddayso kiiskaaga, dukumeentiyada waa in loogu soo diraa boosto ama fakis loogu soo hagaajiyaa xafiiska rafcaanka ugu yaraan saddex maalmood ka hor dacwad-dhegeysigaaga

Haddii aad rabto mid ka mid ah dukumeentiyadan uu garsooruhu tixgeliyo marka go'aan laga gaadhayo, waydii garsooraha inuu calaamadiyo dukumeentiyada sida bandhigyada kiiskaaga marka la joogo dhageysiga. Dhinacyadu waa in ay iska kaashadaan is dhaafsiga macluumaadka ka hor dacwad-dhegeysiga.

Haddii ay jiraan markhaatiyaal muhiim ah oo aan si iskood ah u iman ama haddii dhinaca ka soo horjeedaa diido inuu bixiyo dukumeenti looga baahan yahay si loo caddeeyo kiiskaaga, adiga (ama wakiilkaaga) waxaad codsan kartaa in maxkamaddu ay u yeedho. Codsigaaga waa in isla markiiba la sameeyaa, ku sharaxdaa sababta markhaatiyada ama dukumentiyada loogu baahan yahay, oo aadna bixisaa magacyada iyo ciwaanada markhaatiyada. Garsooraha ayaa go'aamin doona inuu aqbalo ama uu diido codsigaaga.

## Sidee ugu wanaagsan ayaan u soo bandhigi karaa kiiskayga?

Dhageyso waxa uu garsooruhu kuu sheego. Haddii aadan fahmin, weydii su'aalo ka hor inta uusan bilaabmin dacwad-dhageysiga. Xaqiiji inaad fahantay arrimaha dacwad-dhageysiga.

U sharax xaqiiqaha kiiskaaga si cad oo nidaamsan, kaliyana bixi xaqiiqooyinka muhiimka ah. Ha ku lumin wax wakhti ah waxyaabo aan shaqo ku lahayn arrimaha kiiska. Ha ku celincelin waxaad dhahday.

Haddii garsooraha ama dhinaca kale ay ku weydiiyaan su'aal, uga jawaab si toos ah oona daacadnimo ah. Ha ku darin macluumaad dheeraad ah. U diyaargarow inaad waydiiso markhaatiyaashaada su'aalo si aad ugu soo bandhigaan markhaatifurkooda garsoorka. Haddii aad soo bandhigto markhaatiyaal, xaqiiji inay aqoon shakhsi ah u leeyihiin xaqiiqooyinka.

Dhegayso waxa uu dhinaca kale leeyahay. Ha qashqashaadin. Waxaad heli doontaa wakhtigaaga si aad su'aalo u weydiiso oo aad uga jawaabto ka dib marka markhaatigu dhameeyo markhaatifurkiisa/keeda. U soo qaado qalin iyo warqad goobta dacqad-dhegeysiga oo sameyso xusuus-qor si aad u weydiiso su'aalo wanaagsan oo aad si sax ah ugu jawaab-celiso markhaati furka. Waa inaad waydiisaa su'aalaha dhinaca kale ku saabsan oo kaliya arrimaha muhiimka ah halkaas oo maraggu uu caawin karo kiiskaaga.

Xanaaqida, noqoshada qof edeb-daran ama la doodida dhinaca kaa soo horjeeda, markhaatiyada ama garsoorahu waxba kuma saacideyn doonaan kiiskaaga. Shakhsiyaadka qaska keena ayaa laga eryi karaa goobta dacwad-dhagaysiga.

## Maxaa dhacaya kadib dacwad-dhageysiga?

Go'aanka kama dambaysta ah ayaa boosto ahaan loogu diri doonaa dhinacyada sida ugu dhakhsaha badan dacwad-dhegeysiga ka dib. Go'aanku wuxuu sheegi doonaa xaqiiqooyinka muhiimka ah ee kiiska, gunaanadada sharciga ah iyo sababaha go'aan gaarista, iyo amar qeexaya natiijada go'aanka.

## Ma leeyahay xuquuq rafcaan-qaadasho oo dheeraad ah?

Haddii aad u malaynayso in go'aanka garsooruhu khalad yahay, waxaad racfaan uga qaadan kartaa laba siyaabood midkood:

1 Waxaad ka xareynsan kartaa codsi dib u eegis Waaxda Shaqada iyo Sharciga ee Koonfurta Dakota adiga oo ku soo diraya boostada racfaanka 15 maalmood gudahooda ka dib taariikhda go'aanka gaarista:

**Secretary of Labor and Regulation**
PO Box 4730
Aberdeen, SD 57402

Go'aanka Xoghayaha Shaqada iyo Sharciga ayaa markaa laga dacwoon karaa Maxkamadda Maxkamadeynta Guud (Circuit Court) 30 maalmood gudahooda ka dib taariikhda go'aanka Xoghayaha.

2 Waxaad si toos ah ugu xaraysan kartaa racfaanka go'aanka Maxkamada Maxkamadeynta Guud 30 maalmood gudahooda kadib taariikhda go'aanka.

Go'aamada Maxkamada Maxkamadeynta Guud waxaa racfaan looga qaadan karaa Maxkamada Sare ee Koonfurta Dakota. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ka xereysashada racfaanka ee go'aanka maamulka, la tasho qareen.

### Wixii macluumaad dheeraad ah, la xidhiidh:

South Dakota Department of Labor and Regulation
Reemployment Assistance Appeals
P.O. Box 4730
Aberdeen, SD 57402-4730

Taleefonka: 605.626.2310
Fakiska: 605.626.2322
Wixii ah adeegyada TTY, wac 711

Printed on Recycled Paper

Loo-shaqeeyaha Leh Fursad/Barnaamij
Loo Siman Yahay
Waxaa Maalgelisay USDOL | Dib loo eegay 04/23

# Racfaanada Caawimadda Dib-u-shaqaaleysiinta



SIDA LOO DIYAARIYO LOONA SOO BANDHIGO KIISKAADA

SOUTH DAKOTA
DEPT. OF **LABOR**
& **REGULATION**

**dlr.sd.gov**